



African Express Airways Hargeisa Office

WARBIXIN: SHIRKADA DUULIMAADKA EE AFRICAN EXPRESS AIRWAYS – XAFIISKEEDA HARGEYSA OO DIB U HABEYN CASRI AH KUUGU SAMEEYSAY ADEEGYADA DULIMADKEEDA

February 17th, 2019

Hargeisa 17/02/2019 (<http://www.africanexpress.net/> African Express Airways Hargeisa).

Maamulka shirkadda diyaaradaha ee African Express Airways, xafiiskeed Hargeisa, ayaa dib u habeyn casri ah kuugu sameeyay adeega duulimaadka shirkadda oo afar maalmood ugu kala gooshta Hargeysa, Nairobi iyo Muqdisho todobaad kasta. Maamulka gagada caalamiga ah ee Cigaal International Airport ayaa amaan iyo Mahadnaq gaar ah u jeediyay adeegyada hufan iyo shaqo-wanaaga shirkadda African Express Airways ay u ka hirgalisay gagada diyaaradaha ee Hargeysa iyo dhamaan rakaabka boqolaalka qof ah ee ku duula African Express isbuuc walba sida uu ku sheegay warbixin kooban maamulka shirkadda African Express Airways ee Hargeys.



Maalmaha Dulimaadka shirkadda-African-Express-Airways

Isniin kasta	Nairobi	ilaa	Hargeysa
Saalisa kasta	Hargeysa	ilaa	Nairobi
Khamiis kasta	Nairobi	ilaa	Hargeysa
Jimce kasta	Hargeysa	ilaa	Nairobi

Sida muuqata, shirkadda African Express Airways waxa ay saameyn laxaad leh iyo horumar la taaban karo ka sameeysay loolanka tartan ee loogu jiro fursadaha suuqeynta ee shirkaddaha dulimaadka diyaaradaha ee soo caga-dhigta gagada caalamiga ah ee Cigaal – Hargeysa, taas oo mudooyinkii ugu dembeeyayba shirkadda African Express Airways ay hogaanka u hayso.

Tayada Saraakiisha iyo Hawl-wadeenada Shirkadda African Express Airways



Shirkadda African Express Airways – xafiiska Hargeysa, ayaa waxa uu ku guulaystay nidaamka tayaynta saraakiisha iyo hawl-wadeenada iyada oo fursado qaali ah shirkaddu u heshay in ay ka mid noqdaan xeel-dheerayaal aqoon iyo khibrad sare u leh maamulka, maaraynta iyo hawlgalka shaxaynta shaqo iyo adeeg bixinta la xidhiidha dhinaca dulimaadyada diyaaradaha, saraakiishaas oo intooda badan ku soo diyaariyeen tacliintooda waxbarasho dalalka dibadaha sida Maraykanka, UK, India, Malaysia iyo Pakistan.

Fiiro Gaar ah: Qoraalka intaa wixi dhaafsan waxaa habayaya suxufiga galinaya website-ka